



Barn- och utbildningsförvaltningen

WARBIXIN.

Waqti xaadirkan wax go'aanno ah oo lagu xirayo iskuulada iyo xanaanada ma jiraan,• Haddii iskuulada xanaaneynta iyo iskuulada la xiro, waa in waalidiinta ka shaqeeya meelaha muhiinka ah ee bulshada dhexdeeda ah waa in loo fidiyaa daryeel.

Si looga hortago faafitaanka infekshinka covid 19,dawladda ama dagmada waxaa ay go,aansan kartaa in la xiro xannaanooyinka,iskuulada, dugsigu xiliga firaaqada iyo dhamaan meelaha waxbarashada, xiritaankaas awgii waalidiinta ka shaqeeya meelaha bulshada muhiimka u ah waxaa ay u baahan yihiin in la siiyo daryeel hadii aan si kale loo qaban karin caruurtooda.

Hay'adda badbaadinta bulshada iyo u diyaar garowga, ee marka magaceeda la soo gaabiyo loo yaqaan MSB, waxay caddeysay in shaqadu ay bulshada u tahay muhiim waxayna go aansadeen in hayadaha loo shaqeeyo iyo waalidiintaba ay ka fakaraan maxay tahay inay qabtaan haddii ay muhiim noqoto in la xiro.

Waxaa muhiim ah in aad ogaato adiga waalidka ah haday suurowdo in la xiro iskuulada.

- Cidda aad u shaqayso ayaa ah in ay go,aansato kuna soo ogaysiiso in ay go,aansadeen in aad xaq u leedahay daryeelida caruurta (biilka) hadii la xiro iskuulada iyo xannaanooyinkaba, oo ay noqoto in aad la joogto caruurta oo aad ka baaqato shaqada.

- Uma sheegaysid adiga dagmada in ay shaqadaadu u tahay bulshada mid muhiim u ah, kaliya waxaad samaynaysaa in aad diyaar u ahaato iyo in aad haysato cadayn ka timid madaxaaga shaqada.
- Haddii cidda aad u shaqayso ku ogeysiiso in lagaaga baahan yahay iyadoo la raacayo qawaaniinta oo aadana qaab kale u diyaarin karin daryeelka ilmaha, waa inaad la socodsiiisaa degmada Sölvesborg baahidaada

Waxaad ku sheegi kartaa baahidaada adoo adeegsanaya adeegga elektaroonigga ah ee ah www.solvesborg.se. Kuwa aan adeegsan karin adeegga elektaroonigga ah waxaa jira foom.

Maaha inaad wax samayso hadda. Haddii xiritaanku uu noqdo mid ku habboon, adeegga elektaroonigga ah ayaa furmi doona waxaana lagu siin doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida loo sameeyo. Kaliya marka codsigaaga loo gudbiyo dowladda hoose ayaa lagu sheegi doonaa halka ilmahaaga lagu meelayn doono.

Caruurta leh baahiyaha gaar ah xag maskaxeed ama xag jireedba ama baahida bulsho la dhaqanka wey helayaan si toosa daryeelkooda si haqab la,aan ah,sida adiga waalidka u ah ama macalinka ilmaha baahida noocaas ah qaba uma baahnid in aad soo gudbiso warbixinada in uu u baahan yahay meel lagu habeeyo sida iskuulka xannaanada ama kan marka firaaqada la yahay midna.

De samhällssektorer som avses är:

Qaybaha bulsha ee loo gubiyey.

- Energiförsörjning
- Finansiella tjänster
- Handel och industri
- Hälso- och sjukvård samt omsorg
- Information och kommunikation
- Kommunalteknisk försörjning
- Livsmedel
- Militärt försvar
- Offentlig förvaltning

- Skydd och säkerhet
- Socialförsäkringar
- Transporter

Mer information om samhällsviktig verksamhet hittar du på
www.msb.se/foreskriftomsorg